*Janaayo 4, 2022*

# Qorsheynta Loogu Talagalay Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay

**Afeef**
Hagistan ma ahan talo sharci, mana ahan in loo fasirto talo sharci. Hagistan ma samaynayso shuruudo dheeraad ah oo aanu si kale sharcigu u soo rogin. Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) waxay ku dhiiragalinaysaa degmooyinka */barnaamijyada* iyo waalidiinta inay la tashadaan qareenadooda u gaarka ah iyo inay tixgaliyaan sharciyada iyo tilmaamaha gobolka iyo federaalka marka ay goaansanayaan sida ugu wanaagsan ay u gudbin karaan Adeegyada Ka Bogsashada Covid-19 ee La Gaar Yeelay.

Dukumentiyada tusaalaha ah dhamaantood waxaa loogu talagalay inay garab u noqdaan degmooyinka marka la hirgalinayo tilmaamaha loomana baahna iyagoo qoraal ah. Degmooyinka*/barnaamijyada* way sameeysan karaan qaabab u gaar ah *ama geedi-socodyo* ilaa inta *ay ka buuxiyaan shuruudaha* OAR 581-015-222*9*.

Marka macluumaad dheeraad ah la helo, ODE waxaa laga yaabaa inay wax ka beddelaan tilmaamahan si dib loogu milicsado ama loo gudbiyo tafaasiil cusub.

**Taariikhda / Macnaha guud**
Faafida caalamiga ah ee COVID-19 waxay sababtay carqaladayn weyn oo ku timaada ku dhawaad dhammaan dhinacyada nolosha. Waxbarashada dhexdeeda, ka jawaabista khatarta COVID-19 waxay u baahatay tiirar degdeg ah oo lagu wajahayo waxbarashada fog ee dugsiyada Oregon oo dhan. Ardayda qaarkood waxaa u soo hoyatay guul iyagoo adegsanaya Waxbarashada Fog ee Dhammaystiran (CDL). Ardayda qaarkood, inkastoo, ay dhex mushaaxeen CDL, balse yaa u baahan karaan taageero dheeraad ah marka ay ku laabanayaan sanad-dugsiyeedka 2021-22.

Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA) wuxuu qabaa waxbarashada leellitirka ah markay jirto diidmada waxbarashada guud ee bilaashka ah ee habboon (FAPE). Hagahan ma qeexayo nooca waxbarashada ee leellitirka ah. Wuxuu taas beddelkeeda ka hadlayaa adeegyada lagu qeexay gudaha Sharciga Maamulka Oregon (OAR) 581-015-222*9*, kuwaasoo loogu talagalay in wax looga qabto luminta adeegyada COVID-19 iyo/ama xaaladaha haysta ilmaha dartooda kadib cudurka caalamiga ah ee COVID-19, kuwaasoo aan daruuri ahaan ahayn waxbarashada leellitirka ah. Si loo muujiyo farqigaas, ODE waxay tixraacayaan adeegyada lagu qeexay gudaha OAR 581-015-222*9* iyo hagistan sida Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay, si looga kala saaro Adeegyada Sannad-dugsiyeedka La Muddo Dheereeyay (ESY) Services ama waxbarashada leellitirka ah. Haddii, iyo ilaa iyo xad inta, ardaygu u baahanyahay Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay waa go'aan loo gaaro arday kasta oo qaba naafanimo iyadoo lagu salaynayo duruufaha gaarka ah ee ardayga. ODE waxay ku dhiiragalinayaan dego-dugsiyeedyada *iyo barnaamijyada* in loo tixraacaao Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay si la mid ah si loo ilaaliyo farqigaas.

Inkastoo hagistan ay xoogga saarayso geedi-socodyada kooxeed ee Barnaamijka Waxbarashada La Gaar Yeelay (IEP) marka laga eego dhanka Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay, waxaa muhiim ah in la ogaado in dhammaan go'aamada kooxda IEP la gaaro iyadoo la eegayo sawirka guud ee waxbarashada. Ilaa iyo inta ay ardayda oo dhan u baahan yihiin qorshaynta iyo taageerada sanad-

dugsiyeedka 2021-22, ardayda qabta naafanimada waa in la siiyaa fursad ay si siman ugu helaan manhajka guud iyo fursadaha u furan dhammaan carruurta.

Marka geedi-socodyada qorshaynta iyo taageerada waxbarashada guud aysan ku filnayn ardayga u qalma adeegyada waxbarashada gaarka ah, go'aamo gaar ah waa inay gaaraan kooxda IEP si loo hubiyo in ardaygu awood u leeyahay inuu helo manhajka guud iyo mid FAPE u furan. Sida had iyo jeer dhacdo, FAPE waa in si gaar ah loogu go'aamiyaa ilmo kasta oo u qalma, oo IDEA waa inay dhistaa kooxda IEP, sida lagu qeexay OAR 581-015-2210, kooxda ka mas'uulka ah gaarista go'aamadaas ahaan. Degmo-dugsiyeedyadu "waa inay bixiyaan IEP si macquul ah loo xisaabiyey si ay ugu suurtagasho in imuhu sameeyo horusocod haboon marka loo eego duruufaha ilmaha" *Endrew F. v. Douglas County School Dist. Re–1,* 137 S. Ct. 988 (2017).

Hagistan looguma talagalin in lagu xaddido awoodda ama ikhtiyaarka ay degmo-dugsiyeedka u leeyahay inay bixiso adeegyada bogsashada ee guuda ahaan loogu talagalay ardayda. Hagahan waxaa loogu talagalay inuu caawiyo kooxaha IEP si ay u gaaraan go'aamada muhiimka ah ee ku saabsan Adeegyada ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay. Waxaa muhiim ah in la ogaado in dhammaan shuruudaha IDEA ay sii jirayaan oo hagistan aysan la wareegi karin maamulka kooxaha IEP si loo gaaro go'aamo ku habboon ardayda.

**Guudmarka Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay**

Marka aan u wareegayno sanad-dugsiyeedka kaasoo ardaydu badankooda ay dib ugu imaan doonaan dugsiyada si buuxda si fool-ka-fool wax ugu bartaan, dhammaan ardaydu waxay heli doonaan [waxbarshadii aan la dhammaystirin](). Waa muhiim in dugsiyadu tixgeliyaan baahiyaha dhammaan ardayda markay ku soo laabanayaan fasalka. Oo caruurta wajahayso naafanimada, waxaa gaar ahaan waa muhiim in ilmo kasta baahidiisa iyo xaaladihiisa gaarka ah si buuxda loo tixgeliyo iyo in ardaydan helaan adeegyada lagama maarmaanka ah si loo hubiyo inay awoodaan inay helaan FAPE oo ay helaan manhajka guud. Arday badan, oo ay ku jiraan qaar naafo ah, adeegyada dugsigu bixiyo si uu u taageero dhammaan ardayda marka laga gudbayo sanad-dugsiyeedka 2020-21 ayaa ku filnaan doona.

In la gaaro go'aano ku saabsan Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay ay u baahan doonaan iskaashi iyo kaqaybgal macno leh, oo qoto dheer oo ay sameeyaan dhammaan xubnaha kooxda IEP. Haddii ay dhacdo in kooxda IEP ay ku heshiin waayaan in ilmuhu u baahan yahay Adeegyada ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay, ama qaddarta, isxigxiga, ama muddada adeegyadaas, isticmaalka hababka xallinta khilaafdka ee IDEA ayaa ahaan doona ikhtiyaar la heli karo, hadba sida ku habboon.

Kooxda IEP waa in ay tixgaliyaan Adeegyada ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay, xaaladaha la qeexay ee ku jira OAR 581-015-222*9* ama haddii si kale loogu baahdo ku cad IDEA. Adeegyada kale ee waxbarashada gaarka ah, Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay waa in ay go'aamiyaan kooxda IEP iyadoo la eegayo duruufaha guud ee arday kasta iyo iyadoo la go'aaminayo adeegyada loo baahan yahay si wax looga qabto saamaynta safmareenka COVID-19 ku leeyahay ardayga gaarka ah . Macluumaadka waalidka iyo cabashooyinka waa in la tixgeliyaa, sida caadada ka ah geedi-socodka kooxda IEP. Kooxaha IEP waa inay raadiyaan ra'yiga waalidka ee la xiriira haddii iyo inta uu le'eg yahay wakhtiga adeegga ee loo baahan yahay iyo sida adeegyada loo bixin doono. Dugsiyadu waxay leeyihiin dabacsanaan waxayna noqon karaan kuwo hal-abuur leh markay qaabaynayaan Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay.

Kooxaha gaarka ah ee IEP waxay si fiican ugu taagan yihiin inay fahmaan duruufaha gaarka ah, awoodaha , iyo baahiyaha ardayga. Go'aamada ugu wargalka badan uguna habboon waxay ka yimaaddaan kooxaha IEP ee raaca geedi-socod wadatashi oo macno leh. Sidaas darteed, geedi-socodka lagu tixgalinayo

baahida loo qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay waxay si daruuri ugu jihaysan yihiin kooxda IEP iyo maamulkooda go'aanka gaaro. Kooxda IEP ee loogu talagalay ilmo kasta oo u qalma adeegga waa inay ka hadlaan duruufaha ilmaha kadib iyo marka la tixgeliyo safmareenka COVID-19.

**La Iska Rabo (**[Sida Ku Cad OAR 581-015-2229 Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay](#)**)**

- ❑ Degmo-dugsiyeedyadu *ama barnaamijyadu waa inay siiyaan ogeysiis qoraal ah waalidiinta arday kasta oo u qalma adeegga oo ku saabsan fursad kooxda IEP ay ku kulmaan si ay u tixgeliyaan Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay* . ODE waxay u sameeyeen [Warqadda Waalidka ee Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay](#) ee ikhtiyaarka ah ujeeddadan awgeed.
- ❑ Kooxda IEP ee loogu talagalay arday kasta oo u qalma waa inay tixgeliyaan baahida Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay ugu yaraan kulan kasta oo IEP-ga bilowga ah iyo kulan kasta oo dib-u-eegis sannadeedka ee la qabto *inta sharcigan dhaqangalka yahay*.
  - *Xubin kasta oo ka tirsan kooxda IEP, oo ay ku jiraan waalidiinta iyo ardayda u qalma adeegga, waxay codsan karaan in kooxda IEP ay kulmaan si ay u dib ugu eegaan baahida  Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay wakhti kasta.*
  - *Kooxaha IEP loogama baahna inay kulmaan wax ka badan hal mar sanadkii si ay u tixgeliyaan baahida loo qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay haddii aan macluumaadka la cusbooneysiiyay ay muujinayn daruufaha ardayga u qalma adeegga inay isbeddeleen ama ay jirto sabab looga shakiyo in ardayga u qalma adeegga uu u baahan karo wax ku kordhin ama wax ka beddel lagu sameeyo Adeegyadiiisa Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay.*
  - *Kooxaha IEP ee tixgeliyey baahida Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay ee xilligii bilowga IEP ama kulanka dib-u-eegista sannadlaha ah ama ka dib Juun 24, 2021 waa inay dib-u-eegis ku sameeyaan baahida loo qano Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay marka la gaaro dib-u-eegista sannadlaha ah ee soo socota, laakiin loogama baahna inay sameeyaan sidaas markaas kahor ilaa duruufaha ardayga u qalma adeegga ay isbedelleen ama ay jirto sabab looga shakiyo in ardayga u qalma addegga uu u baahan karo wax ku kordhin ama wax ka beddel lagu sameeyo Adeegyadiisa Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay.*
- ❑ *Marka la tixgalinayo baahida loo qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay, kooxaha IEP waa inay tixgeliyaan saamaynta COVID-19 ku leeyahay awoodda ardayga u qalma adeegga u leeyahay inuu kaqaybqaato waxbarashadiisa, horumaro iyo dib-u-sameeyo ku xirnaanshada bulsheed ee asxaabta iyo shaqaalaha dugsiga, iyo la qabsado qaab dhismeedka waxbarashada fool-ka-foolka ah.*
- ❑ *Wixii IEP-yada bilowga ah, kooxaha IEP waa inay sidoo kale dib-u-eegis ku sameeyaan saamaynta COVID-19 ku leeyahay wakhtiga go'an ee qiimaynta bilowga ah iyo go'aaminta u qalmitaanka ee ardayga u qalma adeegga iyadoo la tixgalinayo baahida Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay.*
- ❑ *Wixii dib-u-eegista sannadlaha ah, kooxaha IEP waa inay sidoo kale tixgeliyaan saameynta COVID-19 ku leeyahayhirgelinta IEP-ga ardayga u qalma iyadoo la tixgelinayo baahida Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay.*
- ❑ *Marka Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay lagu taliyo, ardayga u qalma IEP-ga waa in la ogeysiiyo si uu u waafaqo tallada.*
- ❑ *Kadib marka go'aan kasta la gaaro, degmo-dugsiyeedka ama barnaamijku waa inay siiyaan ogeysiis qoraal ah waalidka iyo/ama ardayga qaangaarka ah ee naafada ah oo ku saabsan go'aaminta baahida loo qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay. Ogeysiiskan waa inay ku jiraan dukumeentiyada soo socda:*

- *Bayaan ku saabsan Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay ee lagu taliyay iyadoo lagu saleynayo fikradda macnaha leh ee dhammaan xubnaha kooxda IEP-ga, oo ay ku jiraan waalidiinta iyo ardayda u qalma adeegga, hadba sida ku habboon;*
- *Taariikhaha la saadaaliyay ee bilaabista iyo muddada Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay; iyo*
- *Isxigxiga, qaddarta, goobta, iyo bixiyaha adeegyada ee la filayo iyo haddii adeegyadaan la bixiyo gudaha maalinta waxbarashada caadiga ah ee loogu talagalay ardayga u qalma.*

- ☐ Marka kooxda IEP-ga aysan heshiis gaarin oo ku saabsan baahida loo qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay, waalidka iyo/ama degmadu waxay codsan karaan kulanka IEP-ga La Fududeeyo (eeg Gaarista Go'aanka Ku Saabsan Baahida Loo Qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay). Haddi waalidka iyo degmadu ay doortaan inay ka qaybqaataan kulanka IEP-ga La Fududeeyo, degmadu waa inay ogaysiisaa ODE.. *ODE waxay doorbidaysaa in ogeysiiskan* iyadoo loo dirayo iimayl ode.disputeresolution@ode.state.or.us.
- ☐ Bixinta Adeegyada ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay ee ardayga kama horjoogsanayso waalidiinta inay raadiyaan xaqa iyagoo u marayaan xallinta khilaafaadka ama Dhawritaannada Habraaceed ee kale ee lagu dabaqi karo. Habraacyada oo kale waxay keeni karaan shuruud ah in degmo-dugsiyeedku bixiyo waxbarashada leellitirka ah oo dheeraad ku ah, oo ka duwan, Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay.

**Habdhaqamada La Soojeediyay**

- ⇨ Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay waa inay ahaadaan kuwo gaar ah, gaar u ah ardayga, oo ay go'aamiyeen Kooxda IEP. Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay waa in la tixgaliyaa iyadoo lagu salaynayo wadarta duruufaha ardayga ee looma baahna inay noqdaan adeegyo daqiiqad ka daqiiqad la beddelayo. ODE waxay sameeyeen Su'aalaha Macquulka ah ee Dhiirogelinta ee loogu talagalay Kooxaha IEP si loo tixgeliyo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay si ay u noqdaan dhigaal waxtar leh.
- ⇨ Go'aamo ku gaar gudaha kulanka IEP halkii aad geli lahayd heshiis qoraal ah (sida la oggolyahay ee ku cad 34 CFR § 300.324(4) iyo OAR 581-015-2225(2)(a)). Inkastoo ay u habboonaan karto kooxaha IEP-ga inay cusboonaysiiyaan IEP-ga iyagoon kulan la qaban, kakamada la xiriira go'aaminta Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay way ka fudud yihiin in la dhex mushaaxo marka lagu jiro kulanka marka lala barardhigo wadaxiriirka aan isku midka ahayn ee inta badan lala xiriiriyo isbeddelada lagu sameeyo IEP-ga iyadoon la kulmin.
- ⇨ Qaad dhammaan tallaabooyinka la hirgalin karo si aad u hubiso in waalidku awood u leeyahay kaqaybqaadashada go'aamadaan muhiimka ah. Xoojin dadaalada degmada si loo xaqiijiyo kaqaybqaadashada waalidka ee macnaha leh. Waalidiintu waa xubno muhiim ka ah kooxda IEP.
- ⇨ Diiwaan geli dhammaan isku dayada wadaxiriir.
- ⇨ Ka fogow sii go'aan qaadashada. Yeelashada wadaxiriir wax-ku-ool ah oo waxtar leh wuxuu u baahan doonaa diyaargarow hore oo muhiim ah; si kastaba ha ahaatee, xubnaha kooxda IEP waa in la xasuusiyaa muhiimada ay leedahay ka fogaanshaha sii go'aan gaarista iyo inaan go'aamada kooxda IEP aan la gaari karin kahor kulanka IEP.
- ⇨ Si taxaddar leh u tixgeli taariikhda bilawga iyo muddada ay qaadanayaan Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay. Adeegyadaan waxa la bixin karaa muddo aad u dheer, ma ahan oo keliya dhawrka toddobaad ee ugu horreeya sanad-dugsiyeedka 2021-22. Kooxaha IEP waxaa sidoo kale laga yaabaa inay dib u dhigaan bilaabida kuwo ka mid ah Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay in loo helo wakhti ardaygu dib ula qabsado waxa laga filayo dugsiga iyo/ama kooxda IEP si ay u uruuriyaan xogta muhiimka ah.

- ⇨ Ka digtoonow markaad jadwal u samaynayso Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay inta lagu gudajiro dugsiga maalinta. Tani waxay u keeni kartaa ardaygu meelayn aad u xaddidan ama waxay gacan ka geysan kartaa in la seego waxbarashada guud ee dheeraadka ah.
- ⇨ Gudaha IEP-ga, ku kala saar noocyada kala duwan ee adeegyada la siinayo ardayga (tusaale, waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, Adeegyada Sanad-Dugsiyeedka La Dheereeyay (ESY), Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay) si loo sameeyo diiwaan cad oo loogu talagalay wadaxaajoodyada kooxda IEP-ga ee mustaqbalka.
- ⇨ Kooxaha IEP-ga waa inay diiwangaliyaan qorshaha lagu gudbinayo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay. Barayaasha iyo adeeg-bixiyayaasha la halmaala (haddii lagu dabaqi karo) waa inay sidoo kale diiwaangeliyaan Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay ee la siiyo ardayda ay hayso naafanimada, waana inay la socdaan oo ay raadraacaan horusocodka ardayga ee gaarka ah.

**Ka Gaarista Heshiis Baahida Loo Qabo  Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay**
Kooxaha IEP-ga waxay haystaan xulashooyin marka aysan ku heshiin COVID-19 La Gaar Yeelay Go'aaminta Adeegyada Bogsashada. Sida la isaga baahan yahay ee ku cad OAR 581-015-222*9*(*8*), ODE *waxay u bixin doonaan* kulamada IEP-ga La Fududeeyo ikhtiyaar kale oo xallinta khilaafka ahaan. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan ikhtiyaarada gelida heshiis, fadlan eeg Ka Ka Gaarista Heshiis Baahida loo qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay.

**Dhigaalada**

- Ka Gaarista Heshiis Baahida loo qabo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay
- Waxbarashada Ardayga: Aan la Dhammeystirin, Aan la Lumin
- Tilmaamaha Habdhaqanka Barasho ee Ugu Fiican
- Warqadda Waalidka ee Adeegyada Ka Bobsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay
- Tusaalaha Ajandaha Kulanka IEP ee Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay
- Ilaha Xogta ee loogu talagalay Kooxaha IEP si loo isticmaalo Marka La Tixgelinayo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay
- Su'aalaha Macquulka ah ee Dhiirogelinta ee loogu talagalay Kooxaha IEP si loo tixgeliyo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay
- Isticmaalka Xogta Korjoogteynta Horusocodka si Loo Gaaro Go'aamada loogu talagalay Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay
- Foomka Dib-u-eegista Adeegyada ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay
- Dhawritaannada Habraaceed
- Su'aalaha iyo Jawaabaha (Q&A) ku saabsan Go'aanka Kiiska Maxkamadda Sare ee Mareykanka *Endrew F. v. Douglas County School District Re–1*
- Macluumaadka IEP-ga ee La Fududeeyo:
  - Tixgelinta Fududeynta IEP: Aragtida Maamulaha Dugsiga
  - Tilmaamaha Waalidka iyo Muuqaalka Wehelka ee Xallinta Khilaafka ee Idea
- Macluumaadka Xallinta Khilaafaadka
  - Shaxda Isbarbardhiga Nidaamka Xallinta Khilaafka ee Idea
  - Tilmaamaha Waalidka iyo Muuqaalka Wehelka ee Xallinta Khilaafka ee Idea
  - Tixgelinta Dhexdhexaadinta  loogu talagalay Khilaafaadka Waxbarasho ee Gaarka ah: Aragtida Maamulaha Dugsiga